


# NATIIJOOYINKA BAARISTA ALAABTA EE 2022

Alaabo kala duwan ayaa lala xiririya sunta leedhka ee carruurnimada. Xitaa soo gaarista xadiga yar ee leedhku wuxuu u keeni karaa carruurta dhibaatooyin caafimaadka oo daran sida dhaawaca maskaxda iyo koriinkooda oo yaraada. Waxyeeladda ay leedhku keento waxay noqon kartaa mid rasmi ah, taasina waa sababata ay muhiim u tahay in laga saaro leedhka alaabaheena iyo guryaheena.

## YOOLALKA

- In la baro qoysaska khatarta ay leedahay leedhka ku jirta alaabaha iyo ka hortagga sunta leedhka.
- Hirgelinta in dhiig laga qaado carruurta halista ugu jirta inay soo gaarto sunta leedhku
- In la soo ururiyo macluumaadka noocyada alaabaha ay isticmaalan qoysaska Degmada King ee laga helay sunta leedhka.



| | |
|---|---|
| **19** | **Munaasabadaha Baarista Alaabta** |
| **326** | **Ka qeybgalayaasha loo adeegay** |
| **560** | **Alaabta la baaray** |
| **61** | **Alaabta laga helay leedh qiyaasteedu badanyahay** |

Public Health – Seattle & King County (PHSKC) waxay kaashadeen toban urur si loo bixiyo Natiijooyinka Baarista Alaabta ee 2022.


Munaasabadaha waxaa lagu qabtay meelaha bulshada sida suuqyada khudaarta lagu gado, bandhigyada caafimaadka, iyo fasalada waalidnimada lagu bixiyo. Xubnaha bulshada ayaa lagu casuumay inay u soo qaadaan alaabta laga baarayo leedhka.

## BULSHOOYINKA LOO ADEEGAY

**326 oo ah xubnaha bulshada** ah ayaa alaabahooda loogu baaaray munaasabadihii 2022. Iyadda lagu saleyneyo macluumaadka ay xubnaha bulshada ay wadageen, munaasabadahaasi:

- Waxaa la gaaray **283 oo ah carruur da'doodu ka yartahay lix sano,**
- Waxaa warbixin waxtar leh la siiyey qoysas ku hadlo **17 luuqadood oo kala duwan,**
- Waxaa loo adeegay qoysas ku nool **59 zip code oo kala duwan oo ka mid ah degmada King**

**Sawirka 1.** Ka qeybgalayaasha Isirka/Qowmiyadda




## LUUQADAHA LOOGU ADEEGAY

- Amxaarig
- Carabi
- Dari
- Ingiriis
- Faransiis
- Hindi
- Maay Maay
- Oromo
- Pashto
- Punjabi
- Somaali
- Isbaanish
- Sawaxili
- Tamil
- Tigrinya
- Fiidnaamees
- Yoruba



## HABKA BAARISTA

PHSKC waxay isticmaashay labo qaab si ay ugu baarto leedhka munasabaadaha: Falanqaynta raadka flurescence (XRF) iyo baarista shaybaarka.



### FALANQAYNTA XRF

- Qalabka baarista ee isla markiiba ku siinaya natiijooyinka
- Baarista alaabaha aan la burburin karin (tusaale ahaan, fargal, shuuli , wasaaqyo ama silsilad, qalabka cunto karinta, alaabaha guriga)
- Sax ma u ahan sida baarista shaybaarka

### FALANQAYNTA SHAYBAARKA

- Habka ugu fiican ee lagu garan karo inta qiyaas ahaan leedh ku jira alaabaha
- Waxaa loo isticmaalaa wax yaabaha wax yar laga qaadi karo oo hodhow  la burburin karo (tusaale ahaan xawaash, tarukada, daawada)
- Wax yaryar ayaa lagu milmay aashito xoog leh waxaana lagu falanqaynaya iyadda la isticmaalayo spectrometry plasma mass spectrometry (ICP-MS)






### FIIRO GAAR AH

**Natiijooyinka baarista ee ku jira warbixintani waxay matalayaan oo kaliya qiyaasta leedhka ee ku jirta <u>shayada gaar ah</u> ee lagu baaray munaasabadda**

Qiyaasta leedhka ee ku jirta alaabta la midka ah way kala duwnaan karaa.

## FAHAMKA NATIIJOOYINKA

Haya'adaha dowladda ayaa dejiyey qadarka leedhka ee loo oggolyahay inay ku jiri karto alaabaha kala duwan. Xadidaadkaan waxay ku saleysan yihiin:

- Sida loo isticmaalo alaabahaas (tusaale ahaan, waxa la cuno, waxa maqaarka la marsado, waxyaabaha la xirto)
- Ayaa isticmaalaya alaabtaas (tusaale ahaan, carruurta, ama dadka waa weyn),
- Inta jeer 'isku celcelis ahaan, qof u isticmaala alaabtaas,
- Dhibaatooyinka la adeega isticmaalista alaabaha aan laheyn leedhka ama ay ku yar tahay leedhku.

**Jadwalka hoos wuxuu sharaxaya xadidka PHSKC ay isticmaasho si loo go'aamiyo haddii cadadka leedhku ku jirta alaabta uu yahay mid badan oo walaac leh marka lagu guda jiro Munaasabadda Baarista Alaabta.**

| NOOCA ALAABTA | XADIDKA LEEDHKA | TAAGEERISTA SHARCIYADDA IYO XEERARKA |
|---|---|---|
| Nacnaca | 0.1 ppm | Xadidka sonkorta ee Maamulka Daawada iyo cuntada (FDA) ee ku saleysan xakamaynta wax soo saarka. |
| Xawaashyada, cuntada, daawo dhaqameedka | 2 ppm | Xadidka ku saleysan caafimaadka waxaa qeexay qaabaynta iyo munadda ay qaadeen Public Health—Seattle ee Degmada King. |
| Walxaha la isku qurxiyo, budada diimahu isticmaalaan | 10 ppm | FDA Qorshaha ay u soo dejisay inay ku socdaan warshadaynta leedhka ku jira walxaha bishinta la marsado iyo waxlaha la isku qurxiyo ee korka la mariyo. |
| Alaabaha caruurta, walxaha la xirto sida fargal, shuuli ama silsilad, saadka farshaxanka, alaabaha kale ee guyriga lagu isticmaalo | 90 ppm | Xeerka Hagajinta Badqabka Alaabta Macmiilka 2008 wuxuu dejiyay xadka leedhka ku jiri karta rinjiga iyo guud ahaan waxa korka looga dahaaro alaabta macmiilku isticmaalaan. |
| Suxuunta wax lagu cuno iyo qalabka cuntada lagu kariyo | 90 ppm | FDA waxay dejisay xadka qadarka leedhka ee ka soo daadan karta sagxadaha cuntada; noocyadan falanqaynta shaybarka surtagal ma ahan in lagu baaro munsabadaha. Sidaa darteed, waxaan isticmaalaynay xadka ugu yar ee uu soo saari karo mashiinka gcanta ee XRF, 90ppm. |

## QEYBAHA MILYANKIIBA

Qadarka leedhka waxaa lagu bixiya qeybaha milyankiiba (ppm). Waxaan isticmaalnaa ppm sababtoo ah xitaa qadarka leedhka ee aad u yar, sida 2 ppm ama 0.0002% ee leedhka ay ku jirto cuntada cunuga, ayaa yeelan karta waxyeelo halis caafimaadka u ah. Daawo fiidiyogan TED-Ed si aadu barato sida loo qiyaaso hal qeyb milyankiiba.

# NATIIJOOYINKA

**PHSKC waxay ku baartay 560 alaab Munaasabadihii Baarista Alaabata ee 2022, 61 oo ka mid ah alaabtaan ayaa waxa ku jirtay qiyaas sare oo leedh ah.**

Natiijooyinkan ayaa xaqiijinaya isbeddela lagu arkay qeybaha kale ee dalka Maraykanka, oo ay ku jirto heerarka saree leedhka qaar ka mid ah dhariyada la soo dhoofiyey iyo heerarka aadka u sareeya ee leedhka ku jira indho kuul dhaqmaadka, sida Kohl, Kajal, iyo Surma


**Heerarka ugu sareya ee leedhka laga helay munsabadaha waxay ahayeen Kohl, Surma, iyo Kajal.** Mid ka mid ah indho kuusha waxaa ku jiray 840,000 ppm oo leedh ah, taas oo ka dhigan inay ka sameysanyd 84% leedh.

**11%**

**alaabaha la baaray waxaa ku jiray leedh qiyaasteedu wel-wel leedahay**




**Sawirka 2 Dhowr alaabood oo laga helay leedh qiyaasteedu welwel leedahay**




## WALXAHA LA ISKU QURXIYO

**109 oo ah alaabaha la isku qurxiyo ayaa lagu baaray shaybaarka 15 ka mid ah walxaha la isku qurxiyo ayaa laga helay leedh qiyaastiisu welwel leedahay.**

**Sideed ka mid ah indho kuul dhaqameedka** (Surma, Kohl, iyo Kajal) ayaa lahaa leedh qiyaasteedu add u sareyso oo u dhaxeysa laga bilaabo 390,000 ppm ilaa 840,000 ppm.

**Toddobo kale oo walxaha la isku qurxiya ah (**Burushka madow ee baalasha indhaha la mariyo, rooseeto, Mikiyaajka isha korkeeda la mariyo iyo indho kuusha aan indho kuul dhaqamad aheyn) waxaa ku jiray 15 ppm ilaa 750,000 ppm oo leedh ah.

**Sawirka 3** Qasaska walxaha la isku qurxiya ayaa laga helay in ka badan 10 pm oo leedh ah



## NACNACA

5 nacnac ayaa lagu baaray shaybaarka **Hal nacnac oo laga soo dhoofiyey Mexico ayaa laga helay inuu ku jirto leedh ah 2.6 ppm.**

## XAWAASHAYN, XAWAASH, IYO DHIRTA LAYSKU DAAWEEYO

122 dhirta laysku daaweeyo ah, xawaash, iyo xawaashayn ayaa laga baaray leedh
**Lagama helin alaabahaas leedh badan ama welwel leedahay qiyaastiisu.**

## CUNTO KALE

16 munada cuntada ah yaa lagu baaray shaybaarka.
**Lagama helin alaabahaas leedh badan ama welwel leedahay qiyaastiisu.**

## ALAABTA FARSHAXANKA

3 alaabaha farshaxanka ah ee carruurta ayaa lagu baaray shaybaarka.
**Lagama helin alaabahaas leedh badan ama welwel leedahay qiyaastiisu.**

## DAAWO DHAQAMEEDKA

8 daawo dhaqameedka ah ayaa lagu baaray shaybaarka.
**Lagama helin alaabahaas leedh badan ama welwel leedahay qiyaastiisu.**

## UUNSI

5 nooc oo uunsi/luubaan ah ayaa la baaray, dhamaantood shantaba waxaa laga helay leedh

**Ma laga soo saarin luubaanta/uunsiga go'aamada xadidan ee caafimaadka, si kasta ahaate, marka leedhka la neef jiido waa isha koowaad ee ay dadka u gaarto. Qoysaska keenay luubaanta/uunsiga ayaa loo sheegay inay dib dambe ee u isticmaalin alaabtaas.**


# ALAABTA SAXAMADA DHOOBKA

**66 oo ka mid ah alaabta saxamada ayaa la baaray iyada oo la isticmaalyo XFR. 12 oo ka mid ah alaabta saxamada dhoobka ah ayaa laga helay leedh qiyaastiisu welwel leedahay.** Alaabta saxamada dhoobka ah waxaa ka mid ah alaabta loo isticmaalo in cuntada lagu qeybiyo, wax lagu cuno, ama lagu kaydiyo cuntada oo aan loo isticmaalin cuto kariska.

9 ka mid ah alaabta saxmada ee leedhku ku badnaa waxay ka sameysnaayeen dhoobo.

4 ka md ah 9 ka alaabta saxamada dhoobada ah waxay ahayeen mid ah gacan lagu sameeyay ama waxaa laga sameeyey farshaxan.

**Sawirka 4.** Saxamada dhoobada ayaa laga helay inay ku jirto in ka badan 90 ppm oo leedh ah



## FURAYAASHA

15 furo ayaa la baaray iyada la isticmaalayo falanqaynta XRF.
**14 furo ayaa laga helay leedh qiyaasta ku jirtaa ay welwel leedahay.**

## DIGSIYADA QALANKA

19 digsi ayaa la baaray iyada oo la isticmaalayo falaqaynta XRF.
**8 digsi ayaa laga helay leedh qiyaasta ku jirtaa ay welwel leedahay.**

## Fargal, shuuli, wasaaqyo ama silsilad

11 oo ka mid ah Fargal, shuuli, wasaaqyo ama silsilad ayaa la baaray iyada la isticmaalayo falanqaynta XRF.
**5 qeybood oo ka mid ah ayaa laga helay leedh qiyaasta ku jirtaa ay welwel leedahay.**

## ALAABTA KALE

6 alaababa kale ayaa laga helay **leedh qiyaasta ku jirtaa ay welwel leedahay.**

**Alaabahan waxaa ka mid ah weelka lagu kaydiyo Kajal, koolada boorsada qurxan ee gacanta lagu sameeyey, dhiil Shiinaha lagu sameeyee, furaha kan ku xiran ee baabuurka lagu furo, koofiyadda iyo silsilada furaha.**



## TALLAABOOYINKA XIGA

Xogta laga soo ururiyay munsaabadaha iyo jawaab celinta iskaashada bulshada ayaa loo isticmaali doonaa in kor loogu qaado barnaamijeynta PHSKC iyo munaasabadaha baarista mustaqbalka ee alaabta. Waxaa sidoo kale lala wadaagi doonaa dalka gudihiisa, qaran ahaan, iyo calami ahaan si ay gacan uga gaysato kor u qaadista siyaasadaha iyo faafinta wacyogelinta alaabta leedhka leh.

### SII WADISTA BAARISTA ALAABTA

- Kordhinta maalgelinta ururada bulshada si loo fududeeyo kordhinta wada shaqaynta
- Ururinta macluumaadka halka laga soo iibsaday alaabta iyo qalabbka koowaad ee alaabaha macmiilka
- Kor u qaadista nidaamka maareynta xogta si loo casriyeyo ururinta xogta iyo falanqaynta

### BARAANMIJEYNTA KALE EE PHSKC

- Isticmaalista xogta iyo natiijooyinka si loo ogeysiiyo ilaha iyo qalabka wacyo gelinta ee loogu talay Olalaha Wacyogelinta Ka hortagga Leedhka iyo Munaasabadaa Waxbarashada Bulshada ee 2023
- Mudnaansiinta cilmi baarista iyo waxbarashada alaabaha khatartoodu sareyso sida indho kuul dhaqameedka iyo digsiyada birta ka sameysan

### SIYAASADAHA IYO WADA SHAQAYNTA

- Xogta waxaa loo isticmaalay in lagu cadeyo labada taageero ee xeerka Gobolka Washington ee looga dan leeyahay dejinta xadidka kiimikada ku jirta walxaha la isku qurxiyo iyo leedhka ku jirta digsiyada.

- Xogta lala wadaay iskaashatada PHSKC gudo ahaan iyo caalami ahaan si loo taageero dadaaaladda isbeddelada siyaasadda, iyo dhaqamada wax soo saarka, iyo in bulshada si bilaaran loo ogeysiiyo alaabta leedhku ku jirto

# MAHADCELIN

**Munaasabadaha Baarista Alaabta waxay ahaayeen dadaal wada shaqayn ah taas oo aan suuragali lahayn haddii aanay dadaalkaa badan muujinin shakhsiyaad iyo ururo badan.**

Barnaamijka Sunta iyo Leedhku waxay u mahadceliyaan toban urur bulsho ah kuwaas oo marigeliyey oo qaban qaabiyay munaasabadan oo siiyey bulshada wacyogelin wax ku ool ah iyo waxbarasho ay ku bixiyeen dhowr luuqaad:

- Cultivate South Park
- First Five Years and Beyond
- Horn of Africa Services
- Immigrant Women's Community Services
- Indian American Community Services
- King County Medical Society
- Mother Africa
- Muslimahs Against Abuse Center
- Somali Health Board
- Teniel Sabin Training and Consulting

Waxaan sidoo kale jaclaan laheyn inaan u mahad celino seddex ka mid ah Barnaamijyada King County Hazardous Waste Management: Research Team oo ay ugu mahadinayaan habka ay u hageen qaababka baarista iyo khubarada falanqaynta xogta; iyo Residential Services Program sida ay uga caawiyeen munaasabadaha, oo ay u bixiyeen lacagta baarista shaybarka, iyo la wadaagista alaabta wax lagu nadiifiyo ee aan halista ahay; iyo Policy & Planning Team oo ku xiriiriyay natiijooyinkayaga fursadaha isbedelka Siyaasadda Gobolka Washington.

Ugu dambeyntii waxaan u mahadcelineynaa Toxic Free Future, Joel Gregory, iyo shaqaalaynta shaybaarka ee jaamacadda Washington ee EH iyo taageerada munaasabadaha.